

Explore Age Concern (Sahanka ahmiyad siinta dadka waawayn)

Age Concern, waxay u taagan tahay tageerida iyo fursad siinta dadka waawayn. Tan iyo 1976 waxaanu ka shaqaynay Cardiff oo dhan iyo valiga Glamorgan , si aanu gacan uga gaysano kor uqaadida tayada nolasha dadka 60ka kor u dhaafay.

Adeegyada aanu bixinaa waxbadan ayay u taraan dadka u baahan caawimada yada. Sida:-

-Gaadhsiinta khidmadaha iyo taageerida.

-Siinta waxbarasho guud iyo talo bixin .

-Hore u marinta ama kobcinta waxyaabaha cusub iyo cilmi baadhista.

-Dhiiri galinta shurakadayada iyo wax la qabsiga hay adaha rasmiga ah iyo ururada mushtamaca ee madaniga ah ee ku yaala aga gaarka.

The Ageing Well Programme - (Barnaamijka daryeelka dadka waawayn)..Caafimaad, Hanti iyo xikmad

Markay Joy, David iyo Richard Da' doodii waynaatay waxay doonayaan inay firfircoonida iyo caafimadkooda guud ilaashadaan...Barnaamijka daryeelka dadka waawayne wuxuu ka shaqeeyaa gacan siinta caafimaad iyo daryeelka dadka da' doodu 50 ka kor u dhaaftay iyadoo qayb ka ah adeegyadayada, waxaanu bulshada u qabanaa siminaaro, dadka u sahla helitaanka macluumaad khuseeya caafimaadka iyo anshidad kaloo kala duwan sida: jimicsiga Tai Chai, ciyaarta Line dancing iyo qaar xaga madadaalada la xidhiidha sida: Whist drives, clasyada cunto samaynta, shir shir maalmeedyo, decoupage, farshaxan nimo iyo barashada samaynta shalashka kuraasta la saaro. sideedaba marwalba fursad b aan ku siinaynaa aad kaga barato wax cusub barnaamij kayagan ku dhisan tacliinta fikrad is dhaafsiga, oo ku saabsan cuntada, firfircoonida, taariikhda mujtamaca iyo amaankiisa.. mawaadiic khusaysa diimuqraadiyada mushtamaca maxaliga ah, dhacdooyinkaasi oo ku qabsoomi doona xaafadaha Ely iyo LLanrumney, sidaasoo kale Senior Health Shopkayaga ku yaala Barry, halkaasoo ahayd meeshii ugu horeysay Wales ee laga sameeyo barnaamij noocan ah.

Jimicsigu waa qayb asaasi ah oo ka mida barnaamijkan, iyadoo waliba la sii fidiyey sida:- Tea Dances, Keep Fit, Dabaasha,, Yoga iyo socodka. The Aging Well Programmeku waxuu yahay wax dadka waawayne hiigsado sida Joy, David iyo Richard oo kale ee danaynaya inay caafimaadkooda iyo firfircoonidooda daryeelaan, isla markaana helaan nolol bulsho oo diiran.

The Ageing Well Programme – The Counselling Service.. (Adeega caawinta iyo la talinta)

Ann waxay dareemaysaa kalinimo ..way cidloontahay waxaanay aad ugu baahantahay qof ay ku kalsoontahay oo kadhagaysta waxa ay tabanayso iyo wixii dhibaaya .barnaamijka daryeelka dadka waawayn qaybtiisan Adeega caawintu waxay diirada saaraysaa ilaalinta shucuurta iyo dareenka dadka waawayn , Cardiff dhexdeeda waxaanu samaynaa Adeegyo caawimeed oo u gaara dadka 50 jirka iyo wixii kabadan ee ay haysato mushkilado noocaasi ah una baahan cid ay kala tashadaan ooy ku kalsoonyihiin.

la taliya yaal toobabaran ayaa inta badan waxay nagula shaqeeyaan habka volunteers oo ku deeqaya

wakhtigooda iyo khibradahooda . habka lasoo xidhiidhka Adeega waa sahal sidoo kale xidhiidhka waxaa kuu samayn kara dhakhtarkaaga gaarka ah, social worker kaaga amaba kalkaaliyaha caafimaadka (health visitor), talo bixintaasi oo ka dhici karta guriga qofka wayn amaba xafiis yada talo bixinta taasoo caadi ahaan qaadata saacad wiigiiba mudo dhan lix wiig..

The Engagement Programme (Barnaamijka ka qayb qaadashada)

"Frank's wuxuu ku jiraa barnaamijkan ka qayb qaadasha taasoo u saamaxday inuu lasocdo wax yaabaha uu jecelyahay ee mushtamaciisa maxaliga ah, markuu dada ku waynaadayna wuxuu soo dhawaynayaa fursada uu ku dhiibanayo rayigiisa iyo afkaartiisa gaar ahaan wixii khuseeya adeegyada dadka waawayn

Engagement Programme ku waxuu u soo bandhigayaa fursado badan oo kala jaad jaad ah Frank iyo intii lamid ahba si ay ugu sii jiraan amaba u bilaabaan imika ka qayb qaadashada kulannada,xafladaha iyo shirarka.

Barnaamijka wuxuu soo saaraa warside sadex bilood le ah oo layidhaahdo (Life Times) Life Times waxay cover garaysaa muwduucyo soo jiita ihtimaamka dadka waawayn islamarkana siisaa fursado ay door kaga qaataan soo qorida maqaalo ay ku soo bandhigayaan rayigooda, afkaartooda iyo wixii talo iyo soo jeedimo ah sidoo kale soo jeedinta mawaadiicda ku soo bixi doonta warsidaha.

Hadaba sidaa kulannada iyo wargayska barnaamijku waxuu culayska saaraa dhiirigalinta afkaarta cusub iyo qorshayaasha ay dadku keenaan sida: riwaayadaha xauusta ah (reminiscence theatre project) iyo sidoo kale (focus groups)ka ama kooxaha gaarka ah ee midwaliba arimo gooni ah ka shaqayso sida: Transport ka , caamimaadka iyo guryaynta.

The Engagement Programme ku wuxuu fursad u siiyey Frank inuu soo bandhigo rayigiisa waxna ku lahaado go aan samaynta kadib markuu shaqo gab noqday, taasoo u soo calisay dareenka inuu wali qiimo ku dhexleeyahay bulshadiisa.

Trading Services (Adeegyada baayac mushtarka..xirfadaha)

Audrey waxay waxay u baahantahay Insurance iyada u gaar ah kuna jaan go an baahyaheeda...sidoo kale waxay doonaysaa inay la hadasho qof u jajaban oo si dabacsan oo fool ka fool ah uga jawaab caliya dhamaan su aallaheeda la xidhiidha Insurance ka ..At Age Concern waxaanu hore u marinay majmuucad wax soo saarid iyo adeeyo kale oo u gaara daboolida baahiyaha dadka 50 jirka iyo intii kawayn . iyadoo isticmaalaysa adeegyadan Audrey waxay awood u yeelatay ka faa idaysiga khidmadaha: Home tavel iyo motor insurance ka (tigidho iibsiga doofka iyo cayminta baabuurka) iyadoo lagu xisaabtamayo dadeeda wayn, iyo waliba gasta & electricity scheme...Aid call personal alarmska iyadoon cidkale waxba uga baahan sidoo kale khidmada Funeral plans (qorshe u gaara aaska), Audrey waxa laga caawin karaa soo iibsiga weekly lottery ticket ka oo ah hab ciyaareed lagu helo lacag lana siiyo hay adaha khayriga ah . Dabcan faa idooyinka lacageed ee lagu helo habka adeegani waxay ku shubmayaan oo lagu maal galinaayaa mashruucyo kale oo ay wado Age concern.,

The Advocacy Service ..Khidmada talo bixinta

Val waxay u baahantahay gacan siin si ay u gaadhsiiso rayigeeda iyo afkaarteeda local social services department ka..

Isticmaalka khidmada talo bixinta ee Age Concern waxay noqon kartaa habka ugu wacan ee ay Val ku gaadhsiin karto rayigeeda cidii ay arintu khusayso. khidmada talo bixintu waxay ku adagtahay suldadna u leedahay iyadoo isticmaalaysa shaqaale hab gaara u tooba baran iyo caawiye yaal volunteers ah in dadka 60

iyo intii kawayni helaan, isticmaalaana waxay xuquuq u leeyihiin iyagoo, isticmaalaya arjiyo qaraal ah, teliifoono lagana caawinaayo kolba waxy u baahdaan haday noqoto hehiisyo amaba waan waanooyin lagu matalo dadka waawayn iyo kolba wixii kaga xidhan wakaaladaha iyo meelaha kale. sida Val iyo arinta ka soo gashay local social services departme.

Adeega talo bixinta waad ka faa idayan kartaa adigoo gurigaaga ka soo bixin amaba dhakhtaka jiifa.

The Welfare Rights Service.. Adeega xuquuqda daryeelka

Kor u kaca qiimaha maciishada, Bill wuxuu la soo xidhiidhay local Age Concern ee xaafaduu daganyahay, si loogu soo diro welfare rights advisor gurigiisa ku soo booqda si uu u qiyaaso hadii ay ka maqantahay wax benefit ah oo uu ku dheeli tiro ama ku kaabo baahiyahiisa lacageed.

Kor u kaca qiimaha maciishada dartii sida ninkaa Bill, waxa laga yaabaa , inaad u baahato macluumaad faah faahsan oo kuu cadaynaya waxaa kuu yaala ama aad xaqa u leedahay ee taageero ah, Adeega xuquuqda welfare ka waxaa wada leh kana siman dhamaan dadka 60 kor u dhaafay ee ku nool valega Glamorgan iyo magaalada Cardiff iyo nawaaxideeda, sidoo kale talo bixiya yaasha barnamijka waxay kaa caawin karaan xaga: pension creditka, Council Tax Benefitka, iyo attendance allowance iyo buuxinta arjiyada anagoo gurigaaga kuugu imanayna,

Sanad walba malaayiin pounds oo loogu tala galay benefitka ayaa dawlada dib ugu noqda cidii xaq u lahayd oo doonan wayday darteed....Maxaad u balan balaysaa adigoo karaaya inaad heerka nolashaada kor u qaado.

Hospital Discharge Service.. Caawimada markaad dhakhtarka ka soo baxdid

Lynne waxay galaysaa dhakhtarka waxaanay doonaysaa inay ogaato in cidii garab is taagi doonto markay soo baxdo...caawimadan Hospital Discharge service waa adeegyo wakhti gaaban ku kooban oo uu ka faa idaysan karo qof walba oo ku nool Cardiff iyo Vale Glamorgan ee kor u dhaafay 60 ka, markay dhakhtarka ka soo baxaan. Kaaliye kaa caawiya umuuraha wax soo iibsiga, diyaarinta cuntooyin fud fudud, dawo qaadashada taasoo ah wiiga ka danbeeya shakhar ka soo baxaaga , guud ahaan waxaa lagu imanaayaa sadex ama afar jeer wiigaasi ..Adeegani waa bilaash bila lacag ah .. Hadana wixii deeq ah gacmo furan baanu ku soo dhawaynaynaa.

Caawimada Hospital Discharge service waxay u diiwaan gashan tahay sidii wakaalad Hoyga daryeesha, bixina karta daryeel shakhsi ah oo toos ah.

Age Concern Charity Shops .. Tukaanada khayriga ah

Soo booqashada tukaanadani waa wax Jean aad ugu bogtay..

Age concern charity shops waxay tusaale wacan u yihiin, sidii meel wax laga iibsado looguna tabaruco alaabo mushtamacaaga maxaliga ah, halkaasoo lagu soo bandhigo alaabo kala ged gedisan qof alah qofkii kasoo qabgala dadka waawayn – sidoo kale waxaad ku ogaanaysaa halkan wararkii u danbeeyay ee bulshada aad ku nooshahay laguna qabto ,siminaaro dadka waawayn lagu wacyi galinaayo sida: , ka hortaga crimeka.. caafimaadka iyo daryeelka.

halkan ooy kuu joogaan shaqaale aad u dabacsan oo kuu tilmaami kara qaybta aad ugu hagaagto wax ala wixii adeeg ah eed u baahantahay xaga Age concern. . Waxaana muhiim ah inaad marwalba xasuusato in lacagaha iyo deeqaha kasoo baxa tukaanadan ku kala yaala Caerphilly Road iyo Whitchurch Road, ee Cardiff ay toos ugu dhacaan mashaariic khayriyeed ookale oo hoos yimaada camalka khayriga.

The Good Neighbours Schem (Qorshaha jaarka wanaagsan)

Marianne waxay bilowday inay dareento kalinimo, mana awoodayso inay baxdo ooy soo booqato asxaabteeda sidii waayadii hore... xidhiidhkii tiliifoonkana waa horay is daayeen intay dhaguhu cuslaadeen ba. Markay marar dhowr ah guriga ku kuftay, waxay la soo xidhiidhay Qorshaha jaarka wanaagsan ee xaafadeeda si ay u hesho xog ku saabsan habka caawinta tiliifoonka ee (Aid call) Gurigaa loogu tagay lagana waraystay baahiyaha daryeelka u baahan iyadoo sheegatay u baahnideeda Transport iyo jimicsi waxaa lagu wargaliyay in adeegyada noocan ahi ay ku xidhmayaan kolba sidii loo helo qof ama dad volunteers ah oo xaafadeeda ama meel ku dhaw dagan sidoo kale waxay aad uga cabatay Kalinimada taasoo aad u dhibaysa, waxaan u soo bandhignay inaan kaaliye u soo dirno isla markaana ay xubin ka noqon karto Local Fareind ship Clubka xaafadeeda oo ah gole ay dadka waawayni isugu yimaadaan.

Mudo ka dib Marianne aad bay u raysatay una qiimaysay doorka wayn ee qorshahani ka qaatay dib u soo cashigeeda qiimaha nolosha.

Waxaanu rajaynay naa, in macluumaadkan halka sare ku qorani kuu iftiimiyeen, waxna ka ogaatay Adeegyada kala duwan iyo fursadaha uu soo bandhigayo Age Concern.. ... waa muraadkayaga ugu wayn, inaanu hubsano in adeegyadayadu gaadhaan qayb walba oo bulshada kamid ah. markaa hadaad is leedahay faa iida kaaga soo kordhi karta adeegyadayada amaba aad diyaar u tahay inaad nagula shaqayso habka volunteers nimada, waxaanu aad u jecelnahay inaad nala soo xidhiidho.. tafaasiisha hababka naloo la soo xidhiidhi karo oo dhami waxay ku dhanyihiin xidhka ay waraaqahi ku jiraan.